

BUSTAANKII BALLANTA

W.Q: Nabiil Abdisalan Ali.

Aroor hore ayuu saaka soo kacay, waa abbaara shantii subaxnimo. Caday dheer ayuu ka soo goostay laan ku taallay geed xaafadda toban tallaabo u jira. Waxa uu iska furay go'ii uu jeenigaar sanaa, oo uu ku doonyaystay qolqolka xaafadda. Cabbar ayuu fikirayaa saaka. Cadaygii markuu dhamaystay ayuu doonay inuu ku laabto guriga si uu u toosiyo inankiisii curdeed iyo inantuu dhalay.

Bayle oo basar u socdaa kasoo booday aqalkii, bariidinta iyo balwarranta aabbihii kama illaabo aalaaba. Balse subaxaas badhaadhe muu sheegan, xanuun inuu ka seexan waayey ayuu u sheegay. Waxaanu amar ku siiyay in uu sida ugu habboon ugu hagarbaxo reerkooda inta karaan kiisa ah, una dhaqmo masuul xaafadeed.

Inantii na waa ay soo kacday, oo kijada ayaa ay aadday, qureecda diyaarinteedana waa ay u ambabaxday.

Faarax-Deer waa oday ku adadag dhaqankii hore, aad na u saluugsan jiilkan cusub iyo jewigan ay galeen. Tiro ma leh inta goor ee uu Bayle ka la hadlay in uu taleefanka yareeyo, timahana taalloogga hagaajiyo. "La jaan-qaad jiilka cusub Aabbe" ayuu ugu jawaabaa Bayle. Nasiib darro odaygu ku ma dego intaase, cay iyo canaan ayuu dabada u qabtaa "Inantiina kud'e, talo xumadaas aad ku taabbogalayso, ila ag taagnaan maysid".

Markaasi waa marka keliya ee uu yidhaa talow odaygan lagu daba dhigay, yaa ku dhaafiya! Haddana waa uu ka hakadaa, oo isagu isugu gooddiyaa inuu qaladka leeyahay oo aabbihii aanu lahayn.

BUSTAANKII BALLANTA

“Aabbe qureecdii waan idiin diyaariyey ee kaalaya cuna” ayaa ay ugu baaqday Barni. Faarax-Deer oo taagdarraani ka muuqato ayaa u soo baxay qolqolka, awalba da' waa jirtay, tani se inay jirro tahay waa tu la arko oo aan caad saarnayn.

Aqalka hortiisa ayaa ay kambadhuudhsadeen, waxaa uu galay maanta odaygii xasuuso qadiim ah. Waxa uu taariikhda ku xasuustay hab-dhaqanka Bayle sida uu yahay, iyo sida uu ahaan jirey waa'gay Hooyadii noolayd.

Faarax-Deer: “Waryaa Bayloow, dharaartii Foosiyi aqalkaa ka baxday ayaa kuugu dambaysay fariidnimo iyo firfircoonaan, anna wiilka canaanta ka ilaali ayaan kugu soo koriyay sannaddadaasba, balse tan inaan lagu jirayni waa tu aan saaka go'aansaday. Aniga saddexda habeenannimo iisoo dhici maysid, intaad aroosyo kasoo botorisid”.

Bayle waa'yadan ba nin baxaya ayuu u muuqday oo wax baa u salag-salag lahaa, la yidhi “*Ninkii baxaya buuraha jinkaa loo bidh-bidhiyaa*”. Dood iyo qallafsanaan aanu aabbihii ka horkeeni jirin ayuu ka horgeeyay.

Bayle: “Hooyaday ba sababta dhimashadeeda adaa lahaa, afkeedaan ka hayaa inay odhan jirtay ‘Gurigan mid aan ahayn wedkaygu noqon maayo’, taariikhdaas na aniga ayaa kaa dhergin doona, eegga diyaar uma tihid, Barni na waa xaadir'e waa inoo goor kale” ayuu ugu halceliyey Ina Faarax-Deer.

Odaygii ayaa amakaag iyo anfariir isugu biiray kana naxay ereyada sidaa u qallafsan ee wiilkiisu ugu jawaabay, xanuunkii hayay mid kale ayaa ugu biiray, waxaanu isaga oo xanaaqsan ku yidhi: “liga bax gurigayga, ciddaad doodda diyaarka u la tahayna u tag, dib na kuuma arki karo”.

BUSTAANKII BALLANTA

Bayle Faarax-Deer is muu dhibin ba oo aayar ayuu gasiinkii hortiisa yaalay laastay, aqalkana kasoo qaatay hu'; isugu jira go'yaal iyo macawisyo qaarkood aanay nadiifba ahayn. Waa uu weydaartay aabbihii oo ku na yidhi: "Sidaas iyo ducooy aamiin". Faarax muu rabin inuu dayriyo wiilkiisa, balse xanaaq iyo edbin ayaa ay ka ahayd.

Barni Faarax-Deer waa gashaanti wiil ballansan yihiin. Aabbaheed dharaar ay isku dhaceen ayay ka quusatay; waa ayaantii uu ku gacan-saydhay wiilkii u soo geed fadhiistay, diidmadiisa waxa uu ku sababeeyay in aanu wiilku geyin inantiisa Barni. Rooble iyo Barni gu'yaal badhaadhe iyo bayhoofba leh ayaa ay soo wada qaateen. Xalay fiidkii ayaa ay ku kulmeen bustaanka Faarax-Deer, kuna heshiiyeen in ay is la tagaan (*Masaafaysi*). Balse axdigii in aanu taabo-gelayn ayaa ay ula muuqataa, oo aqalkii waxa kusoo hadhay iyada iyo aabbaheed oo xanuusanaya, in ay ka dhaqaaqdana waa ay la noqon weyday.

Rooble waa wiil deggan dulna leh. Garasho guud ayaa ka dhaxaysa Barni walaalkeed iyo isaga. Bayle marar badan ayuu ka taageeray Rooble sidii uu ku hantiyi lahaa walaashii Barni, balse may hirgelin. Rooble waa madi, aabbihii waxa uu godgalay isaga oo uurka hooyadii ku jira. Hooyadii ayaa illaa dharaartan garab taagan oo aabbe iyo hooyo labadaba u ah. Dugsi tuullada ku yaal ayaa uu macallin-yare ka yahay, gunno yar ayaa uu kasoo qaataa oo isaga iyo hooyadii ay biishadaan. Adeerkii ayaa dumaalay, laba innamood oo kale ayaa ay walaallo yihiin iyo saddex hablood.

Bayle, marka hore waxa udiyaarsanaa qorshe uu caqabad ku ahaa aabbihii, hadda se caqabaddii waa uu kasoo gudbay, inuu fuliyo xeerarkuu dhigtay ayuunbaa u hadhay. Waxa uu ku hamminayay inuu ciidanka qaranka ku biiro, tii na hadda ayuu

BUSTAANKII BALLANTA

fulin karayaa. Saaxiibkii Mooge ayaa ay isku og yihiin oo isla oggol yihiin in ay wada galaan.

Duhur ayaa ay isasoo raaceen iyaga oo jeebka ku sidta baakidh sigaar ah, waxa ay u socdaan taliyaha tababarka ciidanka ee waaxda togga bari loo magacaabay. Mooge aqoon uma laha odaygan taliyaha ah, balse Bayle oo doonaya inuu odayga wax ka baro ayaa yidhi:

Bayle: “War miyaanad garanayn odaygan taliyaha ah?”

Mooge: “Maya, ee adaa nagu wadee bal noo sheeg”. Isaga oo garan la' sababta uu la weydiinayo ayaa ugu halceliyay.

Bayle: “Wiilkii loo diiday walaashay, adeerkii weeyaan”.

Mooge: “Ma Rooble adeerkii? Waar odaygaasi haddaa waa mid kulul”.

Bayle: “Qoodhaa iyo xeradaaye waad taqaan, haddana innaga ina diidi maayo, waxa uu odhanayaa waa innamadii tuullada, hor na waa inaga gelinayaa”.

Mooge: “Haa haa wallee, midh ii shid aan isku yar diiriye”.

Bayle: “Sigaarkuun baan hayay anigu ee bal hoo, dabdaacdii adigaa hayee”. Jeebabka uskaggu daashaday ayuu baadhayaa.

Mooge: “War haa waa runtaa, horta mid baan ilaabay ba”.

Bayle: “Maxaad illawday?” ayuu ugu jawaabay isaga oo qiiqa macaansanaya.

BUSTAANKII BALLANTA

Mooge: “Odaygii maanta muu kusoo caydhiyay?”. Isaga oo qosol raacinaya oo garabka na ka dhirbaaxaya ayuu weydiiyay.

Bayle: “Waar haa, kaasi maanta ayaanu soo kala dhamaannay”.

Siday sheekada u wadeen ayaa ay afaafkii xerada tababarka ciidanka soo gaadheen. Irridda ayaa ay fiiriyeen, waxaanay ku qayliyeen “Ma soo soconnaa?”. In ay soo dhaafaan kadinka, ayaa amar lagu siiyey. Waxa ay fadhiisteen sees kala dhaadheer, oo gudaha xerada ku yaal. Waxaana loo sheegay in taliyihii seexday, taliyexigeenku na uu qolkaas ku qayilayo, isagana aan loo gelin, cid uu oggolaado mooyaane. Bayle iyo Mooge waxa ay go'aansadeen in ay sugaan taliyaha.

Barni ayaa xaajadii ka seexan weyday xalay. Waagii markuu dilaacay ayaa ay gacaliyaheedii wacday una sheegtay in ay arrin degdeg ahi soo baxday, rabtana inay kulmaan barqada. Waa uu aqbalay Rooble. Barqadii ayaa isaga oo naxsan, wadnahana farta ku haya uu guriga kasoo baxay. Barni aabbaheed way u cudurdaaratay waana ay kasoo baxday, soona gaadhay goobtii ay ku kulmi jireen oo ahayd bustaanka Faarax-Deer. Caano uu dhami jirey walaalkeed Bayle, ayaa ay usoo qaadday Rooble, si ay daalka iyo harraadka uga biiso.

Rooble oo neeftuuraya ayaa kadinka bustaanka soo galay. Geed weyn oo hadhac ah ayaa ay ka suntadeen bustaanka kuna hoos haasaawi jireen. Geedkii ayaa uu kasoo daba mudh yidhi, kana naxsaday Barni oo goorahan ba shanqadha tebaysay. Waxay kaftan iyo sheekooyin kooban isku kaabaan ba mar keliya ayuu foolkeeda ka dareemay in xaaladdu is beddeshay, “Maanta degdeg baad iigu yeedhay, maxaa jiray Barni?” ayaa uu weydiiyey, isaga oo taleefanka ka geynaya heesta “Qamar” ee ay wada qaadaan Xaliimo Khaliif Magool iyo Cabdi Salaad Beerdilaacshe.

BUSTAANKII BALLANTA

Inta ay indhihiisa eegtay ayay tidhi aniga ayaa kuu warrami'e caanahan isku qabooji Gacaliye. "Marxabba iyo guddoon" ayuu yidhi. Siday u wada sheekaysanayeen ayaa uu si kedis ah ugu yidhi "Hoo, caanaha ila dhan, waa aynu wadaagaynaaye". Waxay ugu halcelisay beyd (tuduc) ku jira heesta, "Haddaan qado anfaaciga, Adaan kugu qaboobaa".

Beerdilaacshe:

Qormo roob helayoo

Uu qaanidee

Ee xareeddu qarisaad

Qamareey quruxdeeda leedee.

Qalbi-jire Ilaahay

Qaayahiyo sharafta

In qanjiidho leegtahay

Kaama uu qadinine.

Markaan qamar ku eegaba

Qammuunyaa I legadee

Qoortaada dheeree

Lagu qoray cabbaadhyada

Marka aad xaggayga

U soo qalloocisaabay

Ma liqdaa i qabataa.

Magool:

Qorraxdoo aroortii

Qaar la soo baxdoo

Aan caadku qarín baad

Qummanoow

Qaabaddeedii leedee.

Nebi Yuusuf quruxdii

Qaadirkeennu siiyaad

Adna qayb ka wadataayood

BUSTAANKII BALLANTA

Qayrkaa ku dhaaftee.

*Haddaan qado anfaaciga
Adaan kugu qaboobaa.*

*Markaad qun u dhaqaaqdee
Tallaabada aad qaaddee
Daymada il-qabadka le
I qooraansi eegtay
Qososhaa naftayduye.*

Cabbaar kolkii ay heestaa isweydaar sanayeen, ayaa ay heestii go'day, waa ay eegeen, mise dabkii taleefanka ayaa dhacay (damay). Kolkaas ayaa ay Barni sheekada ay maanta ugu yeedhay u bilowday. Waxa ay tidhi:

Barni: “Waxaan maanta kuugu yeedhay arrin aynaan filanayn”.

Rooble: “Oo walaal caqabaddaas aynaan kaba fikirin maxay ahayd?” ayaa uu weydiiyey isaga oo yar naxsan.

Barni: “Shalay subaxdii ayaa ay aabbe iyo walaalkay is afdhaafeen, aabbe na aqalkii ayuu ka dayriyay Bayle. Anigana way ila noqon weyday inaan aabbahay cidleeyo” ayaa ay kusoo koobtay.

Rooble: “Ha ka filan in aan ku ilaabo, ku dayaco, ku na dayriyo abidkay, dhib maleh aabbe caawi oo la joog gacaliso” ayaa uu ku tiraabay.

Barni: “Aabbe aniga ayaa ka dhaadhicinaya guurkeena. Imika wuu talaxgabay oo diidi maayo” ayaa ay ku qancisay Rooble.

Waa ay is nabdaadiyeen, isagao midba dhiniciisa rejo kalgacal qaba. Barni gurigii ayaa ay soo gaadhay. Hawshii guriga ayaa ay bilowday, aabbaheedna caawisay.

BUSTAANKII BALLANTA

Bayle iyo Mooge ayaa taliyihii la kulmay, wuu u fuliyay muraadkoodii soo na dhaweeyay. Tababarka ayaa u socday muddo lix bilood ah.

Muddo dheer oo tababarro ah kadib, nimankii ciidanka booliska ayaa lagu daray. Maalin iyaga oo ku qayilaya guriga Mooge, ayaa ay taaariikhday soo mareen isla soo qaadeen. Bayle ayaa yidhi, “Horta anigu haddii aanan odaygii Faarax-Deer iskaga iman lahayn, halkaa aan maanta joogo maan soo gaadheen, oo ‘Taliye’ la ima dhaheen” isaga oo gacanta ku taabanaya derejada gaashaanka.

Mooge oo lagu xaman jirey ‘Wecel’ ayaa hadalkii qaatay oo yidhi, “Waar anigu islaantii isoo korsatay weligeed il-naxariiseed igu may eegin, innamadeeda na aniga oo arkaya ayaa ay dhunkasho ku xumayn ah dhabanka kaga casayn jirtay. Inta habeen ee aan casho ka helay waa la tirin karayaa. Samada laguu la bax! Maxaan galabsaday? Ma aniga ayaa i korso yidhi? Wanaag baad jeeddaaye, taasi goror duco ah iga heli mayso wallaahi” isaga oo aan daqiiqado qaad afka gelin oo dhidid iyo xanaaq isugu biireen ayaa hadalkii sii watay oo yidhi, “Kuwii igu caayi jirey ‘Garac’ ayaa maanta ii shaxaad yimaadda”.

Bayle oo taariikhdaasi aan sidaas u fahamsanayn ayaa yidhi, “Waar anba xantaas waan maqli jirey runtii. Ragga kuusoo shaxaad yimaad maxaad ka yeeshaa?”

Mooge ayaa ku yidhi: “Dawo maad tidhaahdid! Baystayn baanay iga helin, wejigood gubay!”

Magaca ‘Mooge’ waxa u bixisay habartii soo korsatay. Imika waa saddex xiddigle gaashaankii lagu taxayo munaasabadda sanadlaha ah ee ciidanka qaranka. Waa nin gaaban, kuusan, qallafsan inta noole qallafsan yahay.

BUSTAANKII BALLANTA

Bayle isagu waa gaashaanle, waa taliyaha ciidanka booliska qaybta Istanbul. Kibir ayuu farta ugu yeedhaa ninka uu tuulada uga baahdo, musuqmaasuqa iyo baaddu waa u caado, inta uu taliyaha noqday lacag xalaal ah afka muu saarin! Baaddaas iyo bililiqadaas aad ayuu ugu mamay, uma na dhadhanto lacag aan taas ahayni.

Mooge oo raba in uu sheekada beddelo ayaa yidhi:

Mooge: “Waar horta iiga waran Barni, halkee bay ku dambaysay?”.

Bayle: “Waar waa kii guursaday Rooble. Aabbe wuu la deggan yahay. Waar waan u xiisayba tuuladii”.

Mooge: “Ninkii Rooble ma inan-la-yaal buu noqday? Oo weli ma macallin uun baa talow?” isaga oo yaabban ayuu weydiiyay.

Bayle: “Haa war ilaa imika waa macallin. Beri buu lacag yar isiin jirey aniguna waxaan ka caawin jirey, inaan xagga aabbe uga soo dhammeeyo arrintii guurka” isaga oo qoslaya ayuu sidaa ku yidhi.

Mooge: “Waar adigu weligaaba khadka hoose waad iiga dheerayn jirtay” isaga oo u jeeda waad iga tuugsanayd.

Bayle: “Haa dee ilbaxnimada anigu waan isaga dhashay” ayuu ugu jawaabay.

Qosolka iyo jiipta waa niman isla yaqaan. Waa saaxiibbo is sheeko bartay. Wax ay kala qarsadaan ma jirto, waa duul ku saaxiibay boobka iyo basar xumaanta.

Guri xalaal ah ayaa Barni iyo Rooble wadaageen. Ballantii ay maalintii u qaadday ayay kaga dhabaysay. Waa lammaane dhib iyo dheefba qaybsada. Shirqool dhowr ah ayaa loo maleegay, Alle se waa ka badbaadiyay. Waa ul iyo

BUSTAANKII BALLANTA

diirkeed; deggenaanta iyo dabacsanaantu waa u deyr, wanaagguna waa u wehel. Muddo ayay naawilayeen ubad ay ku indhakuuushaan. Alle waa siiyay. Ilmahoodii curdeedna waxay noqotay Bilan. Duco iyo wanqal ayaa la isugu daray. Waanay badhaadheen, oo hirgashay ballantii. Eegga bustaankii wuxuu nqoday goob ay u ciyaar geeyaan Bilan.

Maalin iyaga oo jooga bustaanka oo farxad ku damaashaadaya Bilanna ciyaarsiinaya ayaa ay isla soo qaadeen geeridii Faarax-Deer, Rooble ayaa weydiiyay:

Rooble: “Miyaanad arag Mooge? sowkii la socday Bayle”.

Barni: “Mayee waa kii ii yimid ee ii tacsiiyeyay. Aaskaad ku aragtay miyaa?”.

Rooble: “Haa isaga iyo Bayle ayaa iilka dhigayba”.

Barni: “War ma xaaraan cunayaashii?!” iyada oo naxsan ayaa ay ku qaylisay.

Rooble: “Maxay cuneen ee aad aragtay? Malaha war la hubo kaasi maaha”.

Barni: “Waa la ii soo sheegay in dadka tuulada Istanbul ku nool oo idil ay ku durduriyaan”.

Rooble: “Alle xaq ha kusoo dabbaalo, haddii ay ilaa heerkaa gaadheen”.

Barni: “Aamiin gacaliye”.

Rooble: “Ma xasuusataa bilowgii barashadeenna iyo Riyadeenii sida ay u rumowday?”

Barni: “Haa, bustaankani xusuus gaar ah ayuu inagu leeyahay Gacaliye”.

DHAMMAAD